

Isbuuclaha BSD ee Sebteembar 28, 2020

#WestviewVotes

Baro sida tababaraha kubbadda koleyga ee Dugsiga Sare ee Westview (iyo macalinka) Michael Wolf iyo kooxdiisu ay u dhiirrigelinayaan ka qayb qaadashada bulshada inta lagu jiro COVID-19.
https://youtu.be/o8qU_AV4gGE

Caawinta IT-ga ee Barashada Dhmeystiran ee Fog

Arag sida Suzanne Peerenboom, Macallinka Teknolojiyada Tilmaamaha Maktabadda (LITT) ee Dugsiga Dhexe ee Five Oaks, u taageerayo baahida IT-ga ee ardayda iyo shaqaalaha iyadoo joogta garaashka gurigeeda.

<https://youtu.be/2wbBHjPDDLs>

Iskuulada Degmada Beaverton waxey raadiyaan cadsadayaal Koox Mashruuca Cilmiga Bulshada

Ardayda, waalidiinta, macallimiinta, maamulayaasha iyo xubnaha bulshada waxaa lagu dhiirigelinaya inay cadsadaan inay u adeegaan Kooxda Mashruuca Daraasaadka Bulshada ee Dugsiga Degmada Beaverton. Kooxdoo waxay dib u eegi doonaan manhajka iyo barashada cilmiga bulshada ee jira si ay ugu soo gudbiyaan Golaha Dugsiga talooyin ku saabsan qaadashada manhajka. Kooxda Mashruuca shaqadiisu waxay bilaabmi doontaa Oktoobar 20 waxayna soo gabagaboobi doontaa Juun 2021.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo mareegta arjiga, fadlan booqo [Social Studies Project Team Application page](#) ama email susan_ouellette@beaverton.k12.or.us

NOQO XARIIF – Macluumaadka Amniqa Qoryaha

Dhibaataada COVID-19 waxay waalidiinta u keentay caqabado hor leh. Caruurtu iskuulka ma joogaan oo gurigooda ayay waqtii badan ku qaataan. Caajiiska iyo go'doominta ay dareemi karaan waxay khatar badan ku tahay nabadjelyadooda. Sugida dhamaan qoryaha guriga kujira – xarreey oo quful, kala-fur rasaastana ka saar- waxay badbaadin kartaa nolosha ilmahaaga.

Hooyooyinka Ha Dalbadaan Waxqabad waxay leeyihin olole waxbarasho oo la yiraahdo [Be SMART program](#). Barnaamijkani wuxuu weydiisanayaa waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah - milkiilayaasha qoryaha iyo kuwa aan qoryaha lahayn si isku mid ah "inay Noqdaan Xarfaan" oo ay qaadaan talaabooyinkan fudud:

Xakameey dhammaan qoryaha yaalo guryaha iyo gawaarida
Ku daydo dabeecad masuuliyad leh
Weydii hubka ku yaal guryaha kale ee ilmahaagu booqdo
Aqoonso doorka qorigu ku leeyahay ismiidaaminta
U sheeg asxaabtaada inay ahaadaan XARFAAN

Qiyaasta COVID-19 ee Dib-u-furidda Dugsiyada

We Waxaan sii wadeynaa inaan si taxaddar leh ula socono heerarka degmada iyo gobolka ee

COVID-19 iyadoo la filaayo in la bilaabo barashada isku dhafan. Lambarada waxaa la soo diraa [weekly](#). Maadaama Iskuulada Degmada Beaverton ay ku yaalaan Degmada Washington, waxaa ku dhajinay degmada Multnomah maxaa yeelay in ka badan 10% shaqaalaheena ayaa ku nool degmadaas dariska nala ah. Hadaan soo koobo , waa inaan aragnaa:

- 30 ama kiisas kayar oo ah COVID-19 100,000kii qof ee ku nool Degmada Washington (iyo Multnomah) in kabadan 7 maalmood 3 todobaad oo xiriir ah
- 10 10 kiisas ama kayar oo COVID-19 ee 100,000kii qof ee ku nool Dagmada Washington (iyo Multnomah) in kabadan 7 maalmood 3 todobaad oo xiriir ah si loo bilaabo Nooca Hybrid-ka ee fasalada 4-12.

Sanduuqyo Cunto oo Bilaash ah

Waxaan ku soo noqonay howshii! Wey mahadsantahay deeq ka timid USDA, hadda waxaan awoodnaa inaan ku bixino sanduuqyo cunto oo bilaash ah Arbacada sedex goobood oo BSD ah oo la bilaabayo **Arbaco, Oktoobar 7:**

Aloha High School: 11 a.m. - 1 p.m. (sanduuqyo ka badan kuwii hore loo qaybiyey)

Beaverton High School: 12 p.m. - 1 p.m.

Southridge High School: 12 p.m. - 1 p.m.

Waxaan rajeyneynaa in midkiiba noqdo 44-lb. sanduuqa waxaa ku jiri doona qudaar iyo miro, caano iyo hilib. Ma jiraan wax shuruud ah oo lku xiran soo qaadashada sanduuq. Qaybintu way u furan tahay dhammaan.